

# KU BIIR WADAHADALKA

## SU'AALO

info@waterfrontseattle.org  
206.499.8040

## BOOQO MAREEGTADENNA

www.waterfrontseattle.org

## KAGA QAYBGAL BARTA INTERNET-KA

f waterfrontseattle  
waterfrontsea  
waterfrontsea

## WADA- SHAQEYN

Barnaamijka Biyo-xigeenka Magaalada Seattle waa dedaal iskaashi ku dhisan oo ay wada sameeyeen Magaalada Seattle, ururrada madaniga ah iyo dadweynaha.



**Seattle**  
Office of the Waterfront  
and Civic Projects

Wuxuu u horseedayaa Waterfront Seattle, oo si dhow ugala shaqeynaya hoggaamiyayaasha madaniga ah, daneeyayaasha iyo guud ahaan dadweynaha Seattle in la abuuro biyo-xigeen loogu talagalay dhammaan dadka.

**Wax badan ka ogow**  
[waterfrontseattle.org](http://waterfrontseattle.org)



Urur aan faa'iido doon ahayn oo iskaashi kala yeesho Xafiiska Mashaariicda Madaniga ah iyo Kuwa Biyo-xigeenka, ururrada la-hawlgalla iyo guud ahaan bulshada in la dhiso wacyiga Waterfront Seattle, la sameeyo lacag ururin iyo in hormuud laga noqdo dayactirka muddadad dheer iyo barnaamijyada.

**Saaxiib la noqo**  
[waterfrontparkseattle.org](http://waterfrontparkseattle.org)

## BULSHADA

Kumanaan faallooyin iyo fikrado dadweyne ayaa waxaa lagu daray himilada Biyo-xigeenka Waterfront Seattle.

**La xiriir**  
[info@waterfrontseattle.org](mailto:info@waterfrontseattle.org)


## MAALGELINTA

Barnaamijka Biyo-xigeenka Seattle ayaa la maalgeliyaa iyadoo loo marayo iskaashiyo ka dhaxeeya Magaalada Seattle iyo bulshada, ururrada madaniga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Barnaamijka si buuxda ayaa loo maalgeliyay.

## ILAHA MAALGELINTA

Deeqsiin  
\$110M

Degmada  
Horumarinta  
Degaanka (LID)  
\$160M



Maalgelinta  
magaalada  
\$295M

Maalgelinta  
dowladda  
\$216M

**WADARTA= \$781M**

## DEGMADA HORUMARINTA DEGAANKA

Iyadoo qayb ka ah istiraatiijiyadda maalgelinta, ayaa Magaalada waxay sameysay Degmada Horumarinta Degaanka ah (LID) sannadkii 2019. LID waa qalab ay milkiilayaasha guryaha u soo maraan wax ku biirinta qayb ka mid ah kharashaadka sii wanaajinta Waterfront Seattle oo ku saleysan kororka ku yimaada qiimaha hantidooda. LID ayaa waxaa la soo gebogabeeyay bishii Juunyo 2021.

**Si aad wax badan uga oogaato hannaanka LID**  
**booqo:** [waterfrontseattle.org/lid](http://waterfrontseattle.org/lid)

**Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan LID, fadlan**  
**kala xiriir Maamulaha LID ee Magaalada Seattle**  
[LID-Administrator@seattle.gov](mailto:LID-Administrator@seattle.gov) ama 206.727.8433.

Juun 2023



# BIYO-XIGEENKA CUSUB EE SEATTLE AYAA QAAB YEELANAYA

Labaatan eykar oo beero cusub iyo meelo dadweyne ah ayaa la dhisay, oo ay ku jiraan beerta promenade ee cusub oo ku teedsan Gacan-biyoodka Elliot iyo jid cusub oo in yar dhulka ka kacsan oo ku yaalla Waddada Alaskan Way. Dekedyarada (Pier) 62 iyo Dekedyarada (Pier) 58 ayaa waxay taageeri doonaan munaasabada bulshada, qoysaska iyo madadaalada firfircoon. Beer cusub oo sare loo qaaday, Overlook Walk, ayaa waxay noqon doontaa isku-xir muhiim ah oo u dhaxeeya Suuqa Pike Place iyo biyo-xigeenka waxayna taageeri doonnaan ballaarinta meesha kalluunka iyo xayawaan-badeedka lagu xannaaneeyo ee Seattle Aquarium. Jidaska Bari-galbeed (East-west) ee ku yaalla Fagaaraha Pioneer, marinka Pike iyo Pine iyo Belltown ayaa la sii hagaajin doonaa, taas oo sii wanaajinaysa gaarista marka laga yimaada xaafadeenna magaalada hoose loona soo socda Gacan-biyoodka Elliott Bay.

SAHAMI OO BAAR BIYO-XIGEENKA MUSTAQBALKA



Qaybta ugu horreysa ee isku-xirka jidka cusub ee ay dadka maraan ee u dhaxeysa magaalada hoose iyo biyo-xigeenka



Farshaxanka, muusik, iyo munaasabada dhaqanka ayaa ku soo noqonaya biyo-xigeenka



2010

Barnaamijka Waterfront Seattle ayaa bilaabanaya

2012

Nakh-shadda fikradda ah iyo Qorshaha Istiraatiijiga ah ee Biyo-xigeenka ee ay ayideen Golaha Magaalada

2014

2017

Dib-u-dhiska Dekedyarada 62 ayaa bilaabanaya

2018

Adeegyada laga soo raray buundada

2019

Jidka dhulka hoostiisa mara ee SR 99 ayaa la dhammeeyay

Burburinta buundada ayaa bilaabatay

Shaqada Jidka Columbia ayaa bilaabanaysa

Dhismaha Waddada Alaskan Way ayaa bilaabanaysa

Burburinta buundada ayaa dhammaanaysa

2020

Jidka Columbia ayaa gaadiidka loo furayaa

Dib-u-dhiska Dekedyarada 58 ayaa bilaabanaysa

2021

Dhismaha Buundada Dadka Lugeeya ee Jidka Union ayaa bilaabanaysa

Meesha ka-saaridda Dekedyarada 58 ayaa dhammaanaysa

2022

Dhismaha Waddada Overlook Walk, Buundada Dadka Lugeeya ee Jidka Marion iyo Dekedyarada (Pier) 58 ayaa bilaabanaysa

Buundada Dadka Lugeeya ee Jidka Union ayaa furmaysa

2023

Dhismaha Pike Pine ayaa bilaabanaya

Furmidda Waddada cusub ee Elliott

Xeebta Habitat ayaa furmaysa


Buundada Dadka Lugeeya ee Jidka Marion ayaa furmaysa

Dhismaha Fagaaraha Pioneer ayaa bilaabanaya

2025



La-hawlgalaheenna aan faa'iida doonka ahayn ayaa hormuud ka ah barnaamijyada, maaliyad ururinta iyo waxyaabo kale oo dheeraad ah



Aasaaska biyo-xigeenka cusub



Laymanka gaadiidka ee cusub ayaa bixinaya isku-xiriirinta gaadiidka ee muhiimka ah marka laga yimaada biyo-xigeenka loona soo socda bartamaha magaalada hoose

## WAXAA HAGA BULSHADA

Barnaamijka Seattle ee Biyo-xigeenka ayaa ku bilowday himilo bulsho ahaan si meesha looga saaro Buundada Waddada Alaskan Way iyo si dib la isugu xiro magaalada iyo biyo-xigeenka. Tan iyo 2010, in ka badan 10,000 qof ayaa ka qaybgaley kullano himilada lagu dejinayo, shirar bulsho, booqashooyin socod lagu tagayo meelaha, dib-u-eegisyada deegaanka iyo waxyaabo kale oo dheeraad ah oo lagu qaabeynayo nakh-shadda aynu hadda dhisayno.

## HADDA DHACAYA

Dhismaha biyo-xigeenka cusub ayaa sii soconaya. In meesha laga saaro Buundada Waddada Alaskan Way ee sannadkii 2019 ayaa noo sahashay in annu dhisno beeraha cusub, dhabbayaasha iyo jidaska in yar dhulka ka kacsan ee booskeeda geli doonna. Sannadka 2023, waxaan sii wadnaa dhismaha jidka beerta, isku-xiriirinta bari-galbeed, Dekedyarada (Pier) 58 iyo in kale. Dhismaha Biyo-xigeenka Seattle (Waterfront Seattle) ayaa dhammaan doonna sannadka 2025.

## DHISMaha

Waxaa naga go'an in aan biyo-xigeenka ka dhigno mid furan oo sii kobcaya inta uu dhismuhu socdo.

Waa kuwan waxa aad filan karto inta lagu guda jiro dhismaha:

- Gelidda ganacsiyada, dadka degaanka iyo dhammaan hababka lagu socdaalo
- Meelaha baabuurta la dhigto ee magaalada hoose oo heerkoodu hooseeyo
- Soonayaasha shaqada iyo jidad kale oo looga weecdo oo la isuduway dhismaha kale ee ka socda degaanka
- War-isgaarsiin cad, joogto ah oo xog-ogaal kaa dhigayso



La soco dhismaha hadda iyo mustaqbalka ee barbar socda biyo-xigeenka dhexe iyo marinka Pike iyo Pine.

# BIYO-XIGEENKA SEATTLE EE LOOGU TALAGALAY DHAMMAAN

Biyo-xigeenka cusub ee Seattle ayaa wuxuu yeellan doonaa meelo dadweyne badan jooga oo nashaad uu ka jiro oo dib isugu xiraysa magaalada iyo Gacan-biyoodka Elliott Bay. Horumarinnada, oo ku fidaya biyo-xigeenka min Fagaaraha Pioneer ilaa Belltown, ayaa waxaa ka mid noqon doonaa meel loogu talagalay beero cusub, xariiqa badda oo wanaagsan, aragtiyo, farshaxan dadweyne, iyo gaaridda wanaagsan oo ay ka mid yihiin jid ballaaran, jid ay dadka lugeeya maraan, iyo isku-xirrada jidadka baaskiilka. Biyo-xigeenka wuxuu noqon doonaa meel si firfircoon loo maareeyo oo ay barnaamijyo ka socdaan, kor-u-qaadaya madadaallada, farshaxanka, waxbarashada, socodka, nasashada, iyo isku-xirrada wanaagsan ee xaafadaha ku xeeran.

U safridda iyo ka gudubka biyo-xigeenka ayaa aad uga sahlan sidii hore waxaanna suurageliyay jidadka ay maraan dadka lugeynaya ee cusub, jaranjarooyinka, wiishashka, waddada baaskiilka iyo jid cusub oo in yar dhulka ka kacsan oo ku yaalla Waddada Alaskan Way.

## 16 MARKETFRONT



Sahami waagii hore, hadda iyo mustaqbalka Seattle adiga oo maraya isku-xirrada cusub iyo goobta ganacsiga ee ku taalla fagaaraha Pioneer, ee dhacda dekedyarayaasha taariikhiga ah iyo suuqa Pike Place Market

## 2 JIDKA CUSUB EE NEW ALASKAN WAY



## 11 DHABBAHA BAASKIILKA



# SAHAMI



## 8 BEERTA PROMENADE

## 13 WADDADA OVERLOOK WALK



# EEG

Isku soo urura, nasta oo raaxaysta aragtiyada Overlook Walk, oo noqon doonta sida buundada dadka lugeynaya ee inta u dhaxaysa Suuqa Pike Place iyo biyo-xigeenka, wuxuunna ku xirayaa ballaarinta Ocean Pavilion cusub Meesha Kalluunka iyo Xayawaan-Badeedka Lagu Xannaaneeyo ee Seattle.

# KU-XIRAN



## 15 DEKEDYARADA (PIER) 62

# CIYAAR



## 10 DEKEDYARADA (PIER) 58

Ogow riwaayado cusub, fan, bandhigyo faneed, ciyaaro, tafaariiq degaanka iyo kuwo kale oo ay soo abaabulaan Saaxiibbada Waterfront Seattle



U dabbaaldeg nakh-shad la joogteyn karo, laga bilaabo Derbiga badda ee dib loo dhisay ee taageera kalluunka salmon ee haajiraya ilaa kaabayaasha biyaha duufaanta ee cagaaran ee hal-abuurka leh

## 14 HORUMARINNADA BAASKIILKA IYO QURXINTA JIDKA EE PIKE PIKE



Ku raaxayso jidadka ay baaskiiladu maraan ee ilaalisan, ee buuxiya meelaha bannaan ee shabakada baaskiilka ee hadda, iyo sidoo kale dayactirka meesha u calaamadaysan dadka lugeynaya in ay jidka ka gudbaan, kuraasta, farshaxanka dadweynaha iyo geedo badan iyo qurxinta dhulka ee guud ahaan marinka

- Degaanka Barnaamijka Waterfront Seattle
- Mashaariicda la xiriira
- 1 Waddada Jidka Tareenka
- 2 Waddada New Alaskan + Waddada Elliott
- 3 Horumarinnada dadka lugeeya ee bari galbeed ee Fagaaraha Pioneer
- 4 Jidka Columbia horumarinta muuqaalka jidka
- 5 Jidka Marion buundada dadka lugeeya ay maraan
- 6 Dib-u-dhiska derbiga badda
- 7 Isku-xirka Jidka Seneca
- 8 Beerta Promenade
- 9 Buundada dadka lugeeya ee Jidka Union
- 10 Dekedyarada (Pier) 58
- 11 Dhabbaha baaskiilka
- 12 Ballaarinta meesha Kalluunka iyo Xayawaannada Lagu Xannaaneeyo ee Seattle
- 13 Beerta sare loo qaadey ee Overlook Walk
- 14 Horumarinnada baaskiilka iyo qurxinta jidka ee Pike Pike
- 15 Dekedyarada (Pier) 62
- 16 MarketFront-ka Suuqa Pike Place
- 17 Mashruuca Jidka Bell
- 18 Musqul dadweyne

